**Lifaaqa 28.95**
City of Lynnwood, WA
Gobalka Washington

LYNNWOOD WASHINGTON

| Isticmaalka Hay'ada oo Kaliya | |
|---|---|
| Received | ___/___/___ |
| Response | ___/___/___ |
| Report | ___/___/___ |
| Briefing | ___/___/___ |

# Foomka Dacwada Title VI (Qodobka VI)

Hadii aad rumeeysan tahay in lagaaga takooray sababa ku saleysan faracaada, midabkaada, ama asalkaada qaran (oo ay ku jirto aqoonta Ingiriisiga ee yar), barnaamijyada ama hawlaha hay'ada, waxaad ka gudbin kartaa dacwad rasmi ah.

Tilmaamaha: Fadlan buuxi foomkan soo socda oo u dir: *Att: Complaints*, 19100 44th Ave. W, Lynnwood, WA 98036 ama iimayl ugu dir: TitleVI@LynnwoodWA.gov

| | |
|---|---|
| **Magacaada:** | **Teleefoon Lambarkaada:**<br><br>**Wakhtiga ugu wanaagsan maalinti ee laguula soo xiriir karo si lagaala hadlo dacwadan:**<br>**7-da subaxnimo ilaa iyo 10-ka subaxnimo** / **10-ka subaxnimo ilaa iyo 1-da duhurnimo**<br>**1-da duhurnimo ilaa iyo 4-ta galabnimo** / **4-ta galabnimo ilaa iyo 7-da fiidnimo** |
| **Ciwaankaaga Iimaylka:**<br><br>**Cinwaankaaga boostada::** **(**Wadada/PO Box, Magaalada Gobalka, Zip-ka**)** | |
| **Magaca, cinwaanka, iyo lambarka taleefanka ee qofka(dadka) lagu eedeeyay inuu ku takooray.** | |
| **Taariikhda dhacdada eeda ay dhacday:** | **Takoorka wuxuu ku saleysnaa:**<br>☐ Isir ☐ Midab ☐ Asalka Qaran (oo ay ku jirto aqoonta Ingiriisiga ee yar) |
| **Fadlan sharraxaad ka bixi waxa dhacay, sababta aad u rumeysan tahay inay u dhaceen, iyo sida laguu takooray. Sheeg qofki ku lug lahaa. Hubso inaad ku darto sida aad u dareensan tahay in dadka kale loola dhaqmay si ka duwan sidaada. Haddii aad heyso wax macluumaad kale ah oo ku saabsan waxa dhacay, fadlan ku lifaaq dukumiintiyo taageeraya foomkan.** | |

FADLAN DHAMAYSTIR BOGGA 2-AAD EE FOOMKAN

MACLUUMAAD DHEERAAD AH

| |
|---|
| **Daawo noocee ah ayaad u raadinaysaa takoorka aad soo eedeysay? Fadlan oggoow in hannaankan uusan sababi doonin bixinta ganaaxa ciqaata ah ama magdhawga maaliyada.** |
| **Qor hadii ay jiraan dadkale oo aan kala xariiri karno maclumaad dheerad ah oo taageero u ah dacwadaada. Fadlan raaci taleefoon lambaradooda, cinwaannadooda, cinwaannadooda iimaylka, iwm.** |
| **Qor hadii ay jiraan hay'ado kale oo aad u gudbisay isla dacwadan:** |

| | |
|---|---|
| **Saxiixa:** (WAA LOO BAAHAN YAHAY) | **Taariikhda:** |

**Lifaaqa 28.95**

City of Lynnwood, WA

# Habraacyada Dacwada Title VI (Qodobka VI)

Hadii aad rumeeysan tahay in laguugu takooray sababa ku saleysan faracaada, midabkaada, ama asalkaada qaran, haddaba waxaad xaq u leedahay inaad dacwad rasmi ah u gudbiso WSDOT inta lagu guda jiro 180 maalmood dhacdada eeda kadib.

SIDA LOO GUDBIYO DACWO

1. Dhameystir Foomka Dacwada Title VI (Qodobka VI), adiga oo ka jawaabaya su'aal walba.

2. U gudbi dacwada oo saxiixan sida lagu tilmaamay foomka. Ma aqbali karno ilaa la soo saxiixo ma ahane.)

3. Marki la helo foomka dacwada, dib ayaa loo eegi doonaa si loo hubiyo inuu dhameystiran yahay. Ogeeysiis qiraya in la helay ayaa lagu bixin doonaa 10 maalmood oo shaqo gudahood. Dacwada waxaa haddaba loo gudbin doonaa hay'ada maalgelinta ee federaalka iyada oo loo sii marinayo Waaxda Gaadiidka Gobolka Washington, Xafiiska Fursadaha Loo Wada Siman Yahay. Hay'ada maalgelinta ee federaalka ayaa u xil saaran dhammaan go'aanada quseeeya in dacwada la aqbalo, (oo la baaro), la tuuro, ama loo gudbiyo hay'ad kale.

4. Marka ay hay'ada maalgelinta ee federaalka go'aansato inay aqbasho, tuurto, ama ay gudbiso dacwada, waxay soo ogaysiin doontaa dacwad-oogaha, iyo hay'adaha kale (sida habboon) xaalada dacwada.

Habraacyadan kaama horjoogsanayaan xaquuqda aad u leedahay inaad si toos ah dacwad rasmi ah ugu gudbiso hay'ada maalgelinta ee federaalka ama aad u raadsato la-taliyaha gaarka ah ee dacwooyinka eeda takoorka. Sharciga federaalka ayaa mamnuucaya cabsi gelin ama aargoosi laguugu sameeyo noocuu ahaadaba.

Habraacyadan waxay quseeyaan dhammaan dacwadaha lagu gudbiyo ee hoos taga Title VI (Qodobka VI) Xeerka Xuquuqda Madaniga ee 1964 sida dib loogu habeeyay iyo Xeerka Soo Celinta Xuquuqda Madaniga ee 1987, ee la xiriira barnaamij, adeeg, ama hawl kasta oo ay maamusho WSDOT ama City of Lynnwood, WA sidookale kale qayb ka helayaasha, la taliyayaasha, iyo qandaraaslaha.